

# WARAAQ TUSAALE AH

5503 XX#### XX P2 EN AT

PO BOX ##### SALEM, AMA 97309  
CIDNA HA U SII DIRIN: KUSOO CELI 3 MAALMOOD  
GUDAHOOD

Magaca laanta/Qaybta: OHP/CAF

Telefoonka/Aqoonsiga Shaqaalaha: XX/503-555-5555

JOHN DOE  
123 MAIN ST  
  
HOMETOWN OR 97000

Kani waa  
shaqaalaha OHA  
ama ODHS kaasoo  
ku caawin kara.

## Ilaasho waraaqdan!

**Waraaqdanu waxay kuu sharraxaysaa  
kaalmooyinkaaga Qorshaha  
Caafimaadka ee Oregon (OHP).**

**Waraaqdaan kaliya waxaa loogu tala  
galay kaliya in xog lagugula  
wadaago. Uma baahnid in aad usoo  
qaadato ballamahaaga daryeelka  
caafimaadka.**

**Waxaan kaliya waraaq cusub kuusoo  
diri doonnaa haddii aad isbaddal ku  
samayso caymiskaaga, amase haddii  
aad mid codsato.**

Kusoo dhowow Qorshaha Caymiska Caafimaadka ee Oregon (OHP). **Tani waa waraaqdaada  
caymiska ee cusub.**

Waraaqdan waxaa ku qoran macluumaadka caymiska ee qoyskaaga loogu tala galay.  
Waraaqdanu ma damaanad qaadayso in aad adeegyada u qalanto. Waraaqdanu meesha kama  
saarayso ogaysiisyada go'aanada shaqaalahaagu kuusoo diro.

Waxaanu kuusoo diri doonnaa waraaq cusub iyo kaarka aqoonsiga ee Caafimaadka wakhti kasta  
oo aad naga codsato ama haddii wax kamid ah macluumaadka waraaqdan ku qoran ama  
kaarkaaga aqoonsiga Caafimaadku ay isbadalaan. Si aad u codsato waraaq cusub ama  
Aqoonsiga Caafimaadka, wac shaqaalahaaga.

Waraaqda jaalaha ah ee halkan ku lifaaqan waxaa kujira jaantus qeexaya adeegyada lagu  
daboolay xirmo kasta oo kaalmooyin ah iyo liiska lambarada ku caawinaya.

Waxaan hoos ku xusnay sababta waraaqdan laguugu soo diray. Taariikhda macluumaadka  
waraaqdan ku qoran uu dhaqangalayo waxaa lagu qoray magacaaga agtiisa.

Sababta waraaqda:

Qorshaha daryeelka ee la maareeyay ama is diiwaangalinta Maareeyaha  
Daryeelka Aasaasiga ah waxaa loo badalay: Doe, Timothy - 08/1/2010

Magacyada waxaa loo badalay:  
Doe, Jane - 08/1/2010

Waraaqdu  
waxay noqon  
doontaa mid  
iskumid ah  
mar walba,  
marka laga  
reebo qaybtaan.  
Kani waa  
macluumaadka  
cusub.

Kani waa bogga 2aad ee waraaqdaada. Wuxuu kuu sheegayaa waxyaabo ku saabsan CCO-gaaga iyo caymisyada kale ee OHA ay ka warqabto.

Jaantuska soo socda waxaa ku qoran macluumaadka caymiska ee qof walba oo u qalma oo qoyskaaga katirsan. Eeg jaantuska Xirmada Kaalmooyinka ee ku lifaaqan si aad u hesho macluumaadka ku saabsan waxa xirmo kaalmo kasta ay daboolayso. Waraaqaha ku jira qaybta Managed Care/TPR waxaa loola jeedaa qorsheyaasha ku qoran bogga Managed Care/TPR Enrollment.

Magaca	Taariikhda dhalashada	# Ka Aqoonsiga Macmiilka	Kharash wadaagga?	Xirmada kaalmada	Iska diiwaangalinta Managed Care/TPR
John Doe	01/01/1968	xx1234xx	Maya	OHP Plus	A, B, C
Jahn Doe	02/01/1969	xx1235xx	Maya	OHP with Limited Drug	A, B, C, G, H, I
Tim Doe	03/01/2006	xx1236xx	Maya	OHP Plus	B, C, D, F
Kathy Doe	04/01/2007	xx1237xx	Maya	OHP Plus	B, C, E, G, H

Noocyadan caymisyada ah waxaa lagu qori doonaa waraaq ahaan qaybta “Managed Care/TPR enrollment”:

- ▶ CCO-gaaga
- ▶ Caymiska kale ee OHA ay ka warqabto, sida caymiska gaarka ah ama Medicare
- ▶ Farmashiga lagu cayyimay, ee xubnaha ka diiwaangashan fee-for-service ee ku jira Barnaamijka Maaraynta Farmashiga

Bogga 3 ee waraaqdaadu waxaa ku taxan magaca iyo lambarka teleefoonka ee la socda waraaq kasta oo qaybtan ah.